Warbixin kugu socota adigaaga waalidka ah ee leh carruur dhigata dugsi hoose-dhexe

2020-08-14

# Ka arday iyo waalid ahaan ku soo dhawaada xilli dugsiyeed cusub iskoolka Norrköping

Waxaan si diirran adiga iyo canuggaagaba idiinkugu soo dhaweyneynaa xilli dugsiyeed cusub dugsiga hoose-dhexe. Waxaan sidoo kale rabnaa in aan idin xusuusinno in ay weli socoto aafadi, oo ay dhammaanteen mas'uuliyad naga saarantahay in aan yareyno faafidda cudurka, Macluumaadkan wuxuu ku saabsanyahay sii socoshada ruutiinka dugsiga hoose-dhexe ee ku aaddan Covid-19, wuxuuna ku wajanyahay adigaaga uu canug iskool kuu dhigto.

Dugsiyada hoose-dhexe, dugsiyada hoose-dhexe ee carruurta caqliga dhiman iyo guriga xilliga firaaqada ee Norrköping sidi caadiga ahayd ayey u furanyihiin oo si caadi ah ayey hawshoodu u socotaa, laakin waxaa shaqadooda la waafajiyay ama la waafajin karaa hadba duruufaha markaas jira. Waxaan raaceynaa talooyinka xukuumadda iyo Hey'adda caafimaadka bulshada, dhammaan hawlaha shaqada ee degmaduna si joogto ah ayey ula soconayaan xaaladda markaas taagan. Dugsiyada hoose-dhexe waxaa diiradda ugu weyn la saarayaa in arday walba uu hadafkiisa gaaryo. Taasi xitaa waa ay khuseysaa xilli dugsiyeedkan. Waxaan ka shaqeyneynaa in aan abuurno fursadaha ugu fiican ee suurta gal ah si uu arday walba ugu hormaro inta ugu dheer ee suurta gal ah

Si wada jir ah waan u yareyn karnaa faafitaanka cudurka, waxaan u baahannahay in aan qaadanno mas'uuliyad wadajir ah, waxaanna u baahannahay caawimaaddaada.

## Sidan ayaad ugu fogaaneysaa in uu cudurku faafo

- **In badan si fiican gacmaha ugu dhaq saabuun iyo biyo.** Canuggaaga kala hadal sida ay muhiim u tahay in badanaa gacmaha la dhaqo.

- **Guriga jooga haddii aad xanuunsantihiin**
  Waa muhiim in ardaygu uu iskoolka ka joogyo haddii uu xanuunsanyahay oo uu leeyahay calaamado cudur sida tusaale ahaan diif, qufac ama

feebaro. Taasi xitaa waa ay khuseysaa haddii ay jiraan calaamado cudur oo khafiif ah. Waa muhiim in aadan dadka kale cudurka qaadsiin. Waxay taasi ka dhigantahay in ay khasab tahay aan ardayda leh calaamado cudur ka codsanno in ay gurigooda aadaan ama aad adigu ka waalid ahaan wadatid iyadoo ku xiran hadba ardayga da'diisa. Waxay taasi khuseysaa dhammaan nooc walba oo ka mid ah cudurrada. Ardayda xanuunsan waa in ay guriga joogaan ilaa ay ka caafimaadaan iyo laba maalin oo dheeraad ah oo aysan lahayn calaamado cudur.

- **Ku qufac ama ku hindhis laabatada xusulka**

- **Dadka kale masaafo u jirno, iskana ilaali in aad cid gacan qaaddid ama hab siisid**
  Waxay taasi intii suurta gal ah ka shaqeyneysaa sida aan waxbarashada nidaamineyno, laakin waa in guud ahaan iskoolka gudihiisa la isu jirsado masaafo ilaa heer ah.

- **Shaqaalaha iyo waaliddiinta kale tixgelin siin marka aad canugga keeneysid iyo marka aad ka soo wadaneysid xilliga firaaqada.** Waxaad u baahantahay in aad caafimaad qabtid oo aadan lahayn calaamado cudur marka aad geleysid maqsinnada guriga xilliga firaaqada. Nagu caawi in aad ka fogaatid ciriiriga. Ilaa intii ay suurta gal tahay waxaan idinku dhiirri gelineynaa in aad dibadda joogtaan marka aad carruurta keeneysaan iyo markaad wadaneysaan.

## Iskool soo xaadiridda

- Waxaan rabnaa in dhammaan ardayda xanuunsan ama leh calaamado cudur oo khafiif ah ay guriga joogaan. Haddii ay carruurtu caafimaad qabto waa in ay iskoolka joogaan oo ay waxbarasho qaataan. Waxbarashadu waxay ka dhaceysaa iskoolka.

## Waxbaad caawin kartaa adigoo iskoolka iyo shaqada ku aadaya si kale oo aan ahayn in aad bas raacdid ama tareenka magaalada dhex mara

- Arday badani waxay maanta iskoolka u raacaan gaadiid dadweyne. Laakinse waxaan rabnaa in kuwa si kale iskoolka ku tegi kara ku boorrinno in ay sidaas kale ku tagaan – u lugey, baaskiil u raac ama si kale dooro haddii ay suurta gal kuu tahay.

- Haddii ay khasab tahay in aad gaadiid dadweyne raacdid waxaa aad muhiim u ah in aad tixgelin siisid oo aad masaafo u jirsatid musaafiriinta kale. Taasi waxay shaqeyneysaa gadiidka dushiisa iyo marka maxaddada la joogo, iyo sidoo kale marka aad gaadiidka raaceysid ama ka degeysid.

Inta aadan raacin gaadiidka u oggolaw kuwa degaya in ay ka degaan. Si loo yareeyo faafitaanka cudurka waa in aad guriga joogtaa oo aadan raacin gaadiid dadweyne haddii aad haba yaraatee dareemeysid calaamad cudur oo hargab ah.

## Wadahadalka horuumarka ardayga iyo kulamada waalidka

- Sida kulamada waalidka ee deyrta ama macluumaadka waalidka loo qabanayo maamule kasta iyo macallin walba goonidiisa ayuu ugu warbixin doonyaa. Sidaas oo kale iskool kasta goonidiisa ayuu u macluumaad dheeraad ah uga bixinayaa goorta iyo qaabka loo yeelanayo wadahadalka horuumarka ardayga.

Bogga norrkoping.se waxaa ku jira macluumaad ku aaddan feyruska corona, su'aalo iyo jawaabo iyo isku xirayaal kuu gudbinaya hey'adaha kale ee dowladda. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusbooneysiiyaa:
https://www.norrkoping.se/information-om-coronaviruset

Waxaa sidoo kale halkan ku jira bog intarneet oo gaar ah oo loogu tala galay carruurta iyo da' yarta norrkoping.se. Halkaas waxaan hal meel isugu ururinnay macluumaad la xiriira feyruska, si ay u fududaato in la helo. Halkaas waxaa ku jira macluumaad rasmi ah oo si fudud loo akhrin karo iyo talooyin ku aaddan sida uu qofku isu daryeelayo haddii uu guriga joogyo oo uu leeyahay calaamado cudur oo khafiif ah, laakin saas oo ay tahay uu isku dayayo in uu waxbarashada la socdo. Fadlan canuggaaga uga warran bogga, ama si wadajir ah isula booqda:
norrkoping.se/corona-information-till-unga

Adigaaga waalid u ah arday dhigta dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga naafada ka ah ama dugsi hoose-dhexe carruurta caqliga naafada ka ah ee leh takhsusyo xagga maaddooyinka ah waxaa laguu soo diri doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan sida uu iskoolka qaabkaas ah uga shaqeynayo yareynta faafitaanka cudurka.

Haddii aad qabtid su'aalo ama wax isweydiineysid ku soo dhawaw in aad la xiriirtid maamulaha ardaygaaga.

Salaan saaxibtinimo

Jenny Östlund, madaxa hawsha dugsiga hoose-dhexe F-6 iyo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga naafada ka ah
Mikael Hultberg, madaxa hawsha dugsiga hoose-dhexe F-6 iyo dugsiga hoose-dhexe ee carruurta caqliga naafada ka ah
Hans Grimsell, madaxa hawsha dugsiga hoose-dhexe 7-9 iyo jardiinooyinka xilliga firaaqada